

Miyuu iskuulku yahay halgan maalin walba ah?

Miyuu ilmahaagu iskuulka dhibaato kala kulmaa?



Wax badan ogow si aad ilmahaaga u caawisid

Miyuu ilmahaagu iskuulka dhibaato kala kulmaa?

Ilmo kasta wuxuu wax u bartaa si gooni ah. Carruurta qaarkood waa iney wax arkaan ka hor inteysan baran. Kuwa kale ayaa ah kuwo gacanta wax ku barta ayna tahay iney gacanta ku qabtaan wax, sida shanta badhan si ay u fahmaan waxa “shan” ay tahay. Hannaanka waxbarashadu ma ahan mid caadi ahaan loo ogaan karo ilaa uu ilmuhu iskuulka ka billaabayo. Markay heerka kow ama labo uu ku jiro, ilmahaaga waxaa laga rajeynayaa inuu la socdo ilaa 20 ama wax la mid ah oo arday ah oo ay isku fasal yihiin. Haddii ilmahaagu uusan raaci karin waxa uu macallinku barayo, asaga ama ayadu way ka harayaan ardayda kale.

Miyuu iskuulku yahay halgan maalin walba ah?

Waalid ahaan, waxaa laga yaabaa inaad tahay qofka ugu horreeya ee arka iney wax qaldan yihiin. Adiga ayaa ilmahaaga yaqaannay noloshiisa ama nolosheeda oo dhan wuxuuna waalidku u badan yahay inuu ogaado isbeddelka akhlaaqdooda. Waxyaabaha laga daawanayo waxaa ka mid ah:

- Rabintaan la'aanta inuu ilmuhu iskuulka aado
- Tiro badan oo jirrooyin yar-yar ah oo ilmaha ka reebeysa inuu iskuulka tago
- Dhibaatooyin ka qabsada fahmida iyo sameynta shaqada guriga
- Dhibaato ka qabsata fahmida iyo raacidda sharraxaadaha
- Dhibaatooyin shaqo isku duwid
- Dhibaato ka qabsata iney hawsha ku sii jiraan

Kuwaani waa qaar ka mid ah akhlaaqaha laga yaabo iney tilmaamaan in ilmahaagu uu khibaato ku qabo iskuulka.

Waa sax, marka waxaad ogaatay qaar ka mid ah calaamadahaan. Hadda maxaa ku xiga?

Haddii ay kula tahay in wax qaldan yihiin, qofka ugu horreeya ee aad la hadlayso waa macallinka ilmahaaga. Qorsheyso kulan, ama wicitaan telefoon haddii taasi ay munaasab kuu tahay, si aad ugala hadashid

walaacyadaada. Si deggan ula qaybso waxyaabaha aad ogaatay ka dibna arag haddii macallinku uu wax laga yaabo iney sharraxaan wixii aad aragtay ka ogyahay. Macallinku waxaa laga yaabaa inuu soo jeediyo feejignaanta fasalka qaarkeed ama shaqo xoogaa ah oo aad adiga iyo ilmuhu guriga ku sameysaan. Tan ayaa laga yaabaa iney ku filan tahay iney xaaladda xalliso

Haddii uusan jirin daciifid ama haddii aad labadiinnu isku raacdaan in ilmahaagu uu la kulmayo dhibaato daran, waxay u badan tahay in macallinku uu ku weydiiyo inaad oggolaatid imtixaanid aqoonsan doonta meelaha gaarka ah ee shaqada dheeraadka ah looga baahan yahay.

Waqtigaan, ayaad waxaad weydiisan kartaa inaad la kulanto Macallinka Taageerada Waxbarashada iskuulka ama LST (macallinka rugta) kaasoo ilmahaaga ka qaadi doona imtixaannada ama qiimeynta waxbarasheed. LST wuxuu kuu sharrixi doonaa qaabka. Weydii su'aalo si aad u xaqiijiso inaad fahmeyso. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad soo wadatid saaxiib ama xubin qoyska ka tirsan oo qiira ahaan kuu taageera faallooyinka laga yaabo inaad seegtayna kuu soo qabta.

Laakiin ilmahaagu si wanaagsan ayuu u dhaqmaa

Waa suuragal in macallinku uusan ogaannin in ilmahaagu uu wax dhibaato ah qabo. Tani waxay gaar ahaan run tahay haddii ilmahaagu uu deggan yahay si wanaagsanna uu fasalka ugu dhaqmos. Ardaydaan waxaa laga yaabaa inaan fiiro gaar ah la siin, gaar ahaan markay ku dhex jiraan koox carruur ah oo aad u fir-fircoon. Haddii, kulankaaga ka dib, macallinku uusan weli oggoleyn in dhibaataadu ay jirto aadna weli walaac ka qabto, waa inaad arrinka kala hadashaa mid kasta oo ka mid ah dadka soo socda, isku xiggaan, si aad ilmahaaga caawino ugu heshid:

- LST
- Maamulaha iskuulka
- Maamulaha waxbarashada gaarka ah
- Dusha ka ilaaliyaha waxbarashada gaarka ah

Haddii aad dhab ahaantii wel welsan tahay, walaacyadaada dabagal. Ku daba joogiddu wax ayey tartaa.

Ilmahaagu dhibaato ayuu qabaa.

Waxaa jira, dabcan, si kale oo laga yaabo inaad u barato in ilmahaagu uu dhibaato u qabo. Xilliga iskuulka, waxaa laga yaabay inaad kulammo dhowr ah ama wada sheekeysii la yeelatay macallinka, iyo maamulaha, kalana hadashay dhibaatooyinka ilmahaagu uu iskuulka kala kulmayey. Kuwaan waxaa ku jiri kara:

- Ku fashilidda fahamka shaqada fasalka
- Inuusan macallinka dhegeysaneyn
- Ardayda kale la dagaalamayo
- Uusan ka soo shaqeynin shaqada guriga loogu diro

Mid, dhammaan, kuwaan waxaa laga yaabaa iney tilmaamayaan dhibaatooyin waxbarasho oo baaxad leh. Ugu danbeyntii, waxaa jiraya inuu macallinku ku soo waco oo kaa codsado inaad timaaddo shir arrin, si looga wada hadlo ilmahaaga. Waxa isu imaanaya waxay noqon doonaan:

- macallinka
- maamulaha
- LST
- khabiirka cilmi nafsiga iskuulka.

Waxaa laga yaabaa iney xoogaa cabsi ku geliso inaad hor fadhiisato aqoonyahannada, sidaas awgeed soo kaxayso qof qoyska ka tirsan ama saaxiib, oo labaduba shucuur ahaan ku taageera si markaas aad u haysato qof kale oo dhegeysan kara waxa la yiri adigana kaal hadli kara kulanka ka dib.

Kulankaan marka la joogo, shaqaalaha waxay u badan tahay iney soo qaadaan suuragalnimada in ilmahaagu uu dhibaato waxbarasho qabo. Tan waxaa gaar ahaan laga yaabaa iney adiga kugu adkaato inaad aqbasho, gaar ahaan haddii ilmahaagu uusan muujin wax dhibaato akhlaaq xumo ah marka uu guriga joogo. Arrinka muhiimka ah waa in la dhegeysto lana xusuusto in qof kasta uu isku dhinac ka soo jeedo --- dhammaantiin waxaad dooneysaan inuu ilmahaagu guuleysto.

Shaqaalaha waxay u badan tahay iney dardaarmaan qiimeyn waxbarasheed si shaaca looga qaado waxa uu

ku xooggan yahay iyo wax uu ku liito ilmahaagu. Tani waxay iyaga ka caawin doontaa go'aan ka gaaridda sida uu ilmahaagu wax u baranayo iyo tabaha ugu wanaagsan ee isaga ama iyada looga caawinayo iney u guuleystaan. Saxiixaaga ayaa loo baahan yahay ka hor inta aan la sameynin wax imtixaanid ah. Waa xuquuqdaada inaad weydiiso wax kasta oo su'aalo ah oo aad dareemeysid iney lagama maarmaan yihiin si aad u fahamtid qaabka qiimeynta iyo sababta laga yaabo inuu caawino u leeyahay. Waa mid la aqbali karo in foomka la soo qaato, ka dibna lagala hadlo dadka kale sida takhtarka qoyskaaga, saaxiibbadaada, ama xubnaha qoyskaaga ka hor inta aadan saxiixin.

Waxaad diidi kartaa inaad oggolaato qiimeynta, haddii aad doorato, laakiin ka feker waxa ay danta ilmahaagu ku jirto. Xusuusnow --- marka waqti hore wax laga qabto waxa ku adag, iney guushana u badan tahay in la gaaro.

Badanaa, waxaa jiri waqti dheer oo loo sugayo oo u dhexeeya waqtiga waalidku oggolaado qiimeynta iyo goorta qiimeynta dhab ahaantii la sameynayo. Haddii aad leedahay wax caymis ah oo kaa bixin doona qiimeyn gaar ah, shaqaaluhu waxaa laga yaabaa iney kuu soo jeediyaan in, iyadoo la daneynayo waqtiga, aad abaabulato in si gaar ah qiimeynta ilmahaaga laguugu sameeyo.

Marka qiimeynta waxbarasheed la dhammeystiro, waxaa lagu weydiin doonaa inaad timaaddo kulan kale oo iskuulka ka dhacaya. Kulankaan, natiijooyinka imtixaanka ayaa adiga lagaala hadli doonaa, isla markaana shaqaaluhu waxaa laga yaabaa iney kuu dardaarmaan horumarinta Qorshe Waxbarasho oo Keli ahaan ah (IEP) kaasoo ku dhismaya meelaha uu ilmahaagu ku xooggan isla markaana aqoonsanaya tabaha waxbarashada si looga kaalmeeyo meelaha dhibaataadu ka jirto.

Qaabkaan inta uu jiro oo dhan waa muhiim in la xusuusnaado in aysan jirin wax "ka qaldan" ilmahaaga. Asaga ama ayadu waxay wax u bartaan si kale waxayna

u baahan yihiin taageero dheeraad ah si ay u gaaraan karti buuxda. Culeyska saar meelaha uu ilmahaagu ku xooggan yahay guushoodana u dabbaaldeeg. Xiriir hoose la yeelo macallinka iyo LST. Dhammaantiin waxaad ka wada shaqaynaysaan inaad xaqiijisaan mustaqbalka ugu wanaagsan ee ilmahaaga.

Wax badan ogow si aad ilmahaaga u caawisid

Ilaha wax laga ogaanayo

Shabakadda internetka Goleyaasha Isku Imaatinka Iskuullada Ottawa-Carleton (OCASC):

Guddoonka Iskuulka Magaalada Ottawa-Carleton (OCDSB) www.ocdsb.ca

Hubi baraha internetka ee Waxbarashada Gaarka ah iyo SEAC

Guddiga Talobixinta Waxbarashada Gaarka ah (SEAC). Warka waxaa laga geli karaa shabakadda internetka ee OCDSB

Ururka Naafonnimada Waxbarashada ee Ontario (LDAO) www.ldao.ca

This pamphlet was produced by the Special Education Committee of the Ottawa-Carleton Assembly of School Councils with the support of the Ontario Ministry of Education and the Ottawa-Carleton District School Board.